

## SOMALIA

### Warbixin Kooban

Waddanku waxa uu u kala qeybsamay gobolo ay maamulaan guud ahaan ama qeybo ka mid ah maamulo kala duwan, oo ay ka mid yihiin dawladda dhexe ee ku meel gaarka ah (TFG), oo xarunteedu tahay Muqdisho; dawlad goboleedka Puntland ee waqooyi bari, oo la safan dawladda dhexe; iyo Jamhuuriyadda goonida isu taagtay ee Somaliland ee Waqooyi Galbeed. Dastuurka ku Meel Gaarka ah waxa uu dhigayaa xoriyadda qofku u leeyahay diinta iyadoo guud ahaan inay dawladda ku meel gaarka ahina ay ixtiraamto xoriyadda diimaha. Hase yeeshee, ma aanay ka dhaqan gelin xoriyadaha uu dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah meelaha ka baxsan dhulka ay dawladdu gacanta ku heyso, gaar ahaan gobolada dhexe iyo koonfureed. Somaliland iyo Puntland waxa ay leeyihiin dastuur u gaar ah, kaasoo ogolaanaya xoriyadda diimaha, inkastoo ay labaduba mamnuucayaan qaadashada iyo faafinta diin aan aheyn tan Islaamka. Mamnuucidda ka bixidda diinta waxaa lagu macneeyay in la mamnuucay ka bixidda diinta Islaamka iyo qaadashada diin kale. Dawladda ku meel gaarka ah iyo maamulka Puntland ama Somaliland midna sooma bandhigin dhaqdhaqaaq ku jeeda horumarinta ama baabi'inta ilaalinta xoriyadda diinta mana aanay la iman dadaal gaar ah oo lagu ilaalinayo xoriyadda diinta sanadkan gudihiisa.

Waxaa jira warbixino sheegaya xadgudub bulshada loo geystay ama heyb sooc ku dhisan diinta, ku dhaqanka iyo aaminsanaanta diinta. Sanadkan gudihiisa, inta badan gobolada koonfurta iyo dhexe waxa ay gacanta ugu jireen kooxda argagixsada ee Al-Shabaab., inkasta oo ay jireen hawlgalo ciidan oo ay fuliyeen Ciidamada Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), dawladda ku meel gaarka ah, Itoobiyaanka, iyo Ciidamo Kenya ah oo ka xoreeyey dhulkii ay gacanta ku hayeen. Al-Shabaab waxa ay hagar daamo u geystaan dadka lagu tuhmo in ay ka baxeen Islaamka, iyagoo dilay wadaaddo Suufiyiin ah oo aan u hogaansamin sida ay u tarjunteen Islaamka iyagoo sidoo kale dilay ama xubin goyn ku sameeyey kuwa aan u hogaansamin sharcigooda, isla markaana burburiyeen oo dhulka la simeen qabriyada suufiyada iyo masaajiddo.

Dawladda Mareykanku safaarad kuma laha waddanka waana la adkeeyay safarka saraakiisha dawladda Mareykanka. Isaga oo kaashanaya siyaasadda kor kala socoshada ee waddanka, waxa ay dawladda Mareykanku si joogta ah u taageersan tahay Shirkii Nabadda ee Jabuuti iyo soo af jaridda mudada ku meel gaarka ah oo

ku eg 20ka Agoosto 2012 sida uu dhigayo heshiiskii Kampala ee la saxiixay bishii Juun.

### **Qeybta Iaad. Tirokoobka Diimaha**

Tiro koobkii ugu dambeeyey waxaa la sameeyey 1975tii iyadoo nabadgelyada darada daba dheeraatay ay ka dhigtay mid aan suurtoagal aheyn in la helo tirakoob sugan oo sax ah. Dadka intooda badan waa dad Suni muslim ah oo suufi ah. Waxaa jira mujtamac aad u yar oo is qariya oo masiixiyiin ah iyo tiro yar oo dad ah oo diimo kale aaminsan. Kooxo salafiyiin ah oo leh hogaamiyayaal siyaasadeed ayaa sii baahaya.

### **Qeybta II. Xaaladda Dawladda ee Xoriyadda Diimaha**

#### **Keyndaabka Siyaasadda\Sharciga**

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxaa la qoray markii la abuuray dawladda ku meel gaarka ah 2004tii, waxaana diinta qaranka laga dhigay Islaamka; hase yeeshee, waxaa kale oo uu dhigayaa "(a) muwaadiniinta Soomaaliyeed...waxa ay xaq u leeyihiin una siman yihiin sharciga iyada oo aan lagu kala soocin qowmiyadda, dhalashada, diinta,rag iyo dumar ama raacsanaanta siyaasadda.

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ahi ma laha qeyb xadideysa ama ilaalineysa diinta qofku qaadanayo. Hase yeeshee, qodobka 71aad ee dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa "in aan arrimaha lagu xusin ama aan ku caddeyn dastuurkan", waxaa la adeegsanayaa dastuurkii 1960kii iyo sharciyada qaranka u degsan. Dastuurkii 1960kii waxa uu si cad u qeexayaa: "Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu cabiri karo ra'yigiisa si xor ah u doorto u sheegto uguna cibaadeysan karo diintiisa isagoo u hogaansan xuduudaha uu sharcigu u sameeyey kuwaas oo lagu cadeeyey sharciga ujeedaduna tahay ilaalinta akhlaaqda, caafimaadka dadweynaha, [iyo] kala dambeynta."

Dastuurka Puntland ee baarlamaanku ansixiyey 2009 oo golaha odoyaashuna ogolaadeen 18kii Abriil waxa uu dhigayaa in aan cidna lagu qasbi karin wax ka duwan waxa qofku aaminsan yahay. Hase yeeshee, waxa kale oo lagu xusay in qofku aanu ka noqon karin Islaanimada waxaana uu mamnuucayaa faafinta diin aan tan Islaamka ahayn. Qeybta mamnuucidda ka bixidda diinta waxaa lagu macneeyay in la mamnuucay ka bixidda diinta Islaamka iyo qaadashada diin kale.

Dastuurka Somaliland waxa uu dhigayaa in la ilaaliyo xuquuqda xor u ahaashaha wuxuu qofku aaminayo. Hase yeeshee, waxaa kale oo ku xusan in shareecada Islaamku aanay ogolayn in qofku diinta ka baxo (ridoobo), in masaajidka lagu faafiyo waxyaabo kala qeybiya qaranka, waxaana uu mamnuucayaa in la faafiyo diin aan aheyn tan Islaamka. Qeybta mamnuucidda ka bixidda diinta waxaa lagu macneeyay in la mamnuucay ka bixidda diinta Islaamka iyo qaadashada diin kale.

Xeerka Ciqaabta ee Soomaaliyeed oo lagu maamulo gobolada intooda badan, inkastoo aan inta badan la dhaqan gelin, ma mamnuucayo in qofku islaanimada ka baxo. Hase yeeshee, waxa uu mamnuucayaa af lagaadeynta ama (cambaareynta) Islaamka. Cutubka 1, qodobka 313, ee Xeerka Ciqaabta waxa uu dhigayaa: "Cid kasta oo diinta Islaamka si cad u hor istaaga waxa uu mudanayaa ciqaab iyo xarig ugu badnaan laba sano ah, iyadoo cid kasta oo diinta Islaamka si cad u ceebeysa oo hor istaagta dadka muslimiinta ah ama goobaha cibaadada loogu talo galay isaguna ciqaabtaas oo kale ayuu mudanayaa."

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah, dastuurka Somaliland iyo Puntland waxa ay dhigayaan in madaxweynaha dalku noqdo Muslim. Dastuurka Somaliland waxa uu dhigayaa in qofka isu sharaxaya madaxweynanimada, madax weyne ku xigeenka iyo aqalka wakiiladu dhamaantood noqdaan Muslimiin. Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah iyo kan Puntland waxa ay dhigayaan in qofka isu sharxaya madaxweynanimadu uu noqdo Muslim, laakiin ma xusayo in sidoo kale laga doonayo jagooyinka wasiirada, xubnaha baarlamaanka iyo ra'iisul wasaaraha.

Bishii Maajo 2009kii waxa ay sharci dajiyayaashu ansixiyeen dhaqangelinta shareecada Islaamka dalka oo dhan. Qodobka 8aad ee dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa ""in shareecada islaamku tahay halka loo noqnayo sharci dajinta qaranka." Dastuurka Somaliland waxa uu dhigayaa in sharciyada qaranka gundhig looga dhigo shareecada Islaamka kamana hor iman karaan. Dastuurka Puntland waxa uu ogol yahay in dhamaan sharciyada gobolka aasaas looga dhigo shareecada Islaamka.

Inta badan maamulka cadaaladda ee gobolada intooda badan waxaa asaas u ah Xeer (hab dhaqameed iyo caadooyin), shareecada Islaamka iyo sharciga madaniga ah ee wixii ka horeeyay 1991kii dawladdii Maxamed Siyaad Barre. Xeyndaabka xagga sharciga waa mid ay ku kala duwan yihiin si la taaban karo maadaama uu mujtamac kasta gooni ahaantii dhaqangeliyo oo isugu maamulo shareecada, taasoo aan inta badan jooqta aheyn.

Dastuurka Somaliland waxa uu xadidayaa abuuritaanka xisbiyada siyaasadeed gaar ahaan kuwa ku saleysan kooxaha diinta, caqiidada ama tarjumaadda ku salaysan diin. Dastuurka Puntland, dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah iyo dastuurkii 1960kii isku xirayaan abuuritaanka xisbiyada siyaasadda iyo diinta.

Wasaaradda Arrimaha Diinta ee dawladda ku meel gaarka ah waxa ay ogolaatay diiwaan gelinta ururada diinta; hase yeeshee, awoodda ay ku dhaqangeliso diiwaan gelintaas waa mid aad u yar. Kooxahaasi waxa ay ahaayeen kuwo sii wada hawlahooda iyada oo aan la diiwaan gelin wayna yar tahay awoodda lagula socon karo ama lagu joojiyo hawlgalkooda. Gobolada koonfurta iyo dhexe waa kuwo ka baxsan maamulka dawladda ku meel gaarka ah. Si loo furo dugsiyada lagu barto diinta ee Puntland iyo goobaha cibaadada waa in ay ogolaasho ka helaan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ee Puntland. Si loo furo dugsiyada lagu barto diinta iyo goobaha cibaadada ee Somaliland waa in ay ogolaasho ka helaan Wasaaradda Arrimaha Diinta ee Somaliland. Ma jiraan ciqaab gaar ah oo loo xadiday ama cawaaqib ka dhalan karta haddii dugsiyada ama goobaha cibaadada ogolaasho la'aan la furo.

dawladda ku meel gaarka ah, maamulka Puntland iyo Soomaaliland waaxa ay ogolaadeen in diinta lagu dhigo dugsiyada. Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah qodobkiisa 24aad waxa uu dhigayaa: "Barashada Islaamka waa mid waajib ku ah ardayda dhigata dugsiyada dawladda iyo kuwa gaarka ahba. Taasi ma khuseyso ardayda aan muslimiinta aheyn" Dugsiyada gaarka ah ayaa waxbarashada ardaydu ka helaan dhamaan gobolada dalka, iyada oo inta badan laga dhigo barashada diinta. Tiro la taaban karo oo ah dugsiyada lagu barto diinta oo laga maalgeliyo dibadda ayaa ka jira waddanka oo dhan, kuwaasoo bixiya waxbarashada aasaasiga ah iyo mid guud oo waafaqasan aragtida salafiyiinta, gaar ahaan dhulka ay gacanta ku hayso kooxda Al-Shabaab.

Jaamacadda Muqdisho, Jaamacadda Bariga Afrika ee Boosaaso (Puntland), iyo qaar badan oo ka mid ah dugsiyada sare ee Muqdisho waxaa maalgeliya oo maamula hay'ado ku xiriirsan Ururka Islaamka ee Al-Islah.

Dawladda ku meel gaarka ah, Puntland iyo Somaliland waxaa looga dabaaldegaa ciido diimeedka iyo kuwa qaranka ee hoos ku xusan: Ciidul-Fitriga, Ciida-Carafo (Sanadka Cusub), iyo Micraajka. Marka lagu daro Jimcaha oo dadku ka qeyb galaan Salaadda Jimacaha.

## **Hab Dhaqanka Dawladda**

Ma jiraan warbixino sheegaya in dawladda ku meel gaarka ah, Puntland ama Somaliland ay ku xadgudbeen xoriyadda xagga diinta, oo ay ka mid tahay in dadka diinta darteed xabsiga loogu xiro

Ma jiraan dhacdooyin la garanayo oo dad lagu ciqaabay ka dib markii ay ridoobeen oo diin kale qaateen, ama iyaga oo dadka diinta ka saraaya dhulka ay gacanta ku hayaan Somaliland, Puntland iyo dawladda ku meel gaarka ah.

Ma jirin goob ay si aan qarsoodi aheyn ay ugu cibaadeysan kareen dadka aan muslimiinta aheyn.

Ma jirin warbixino sheegaya dad loo xirxiray waxyaabo la xiriira xagga diinta dhulka ay gacanta ku hayaan dawladda ku meel gaarka ah, Puntland, Somaliland iyo Ahlu Suna Wal Jamaaca (ASWJ) - koox suufiyiin salka ku haysa oo maleeshiyadooduna ku dhaqmaan fikradaha suufiyada. Hase yeeshee, laakiin waxaa jiray warbixino sheegaya dad loo xirxiray diinta dhulka ay gacanta ku hayaan Al-Shabaab, tirada dhabta ah lama garaneyn sanadkan.

## **Xadgudubyada Ay Geystaan Kooxaha Falaagada Ah Ama Xoogagga Ajnabiga Ah Ama Kooxaha Argagixisada Ah**

Waxaa sii socday dagaalada u dhaxeeyey Al-Shabaab iyo dawladda ku meel gaarka ah iyo kooxaha raacsan. Al-Shabaab waxa ay ku xukuntaa sida ay u tarjumatay shareecada Islaamka ugana xukuntaa Muslimiinta kale. Al-Shabaab waxa ay dil la beegsataa saraakiisha dawladda iyo kuwa raacsan iyagoo u aqoonsan in ay Islaanimada ka baxeen oo ridoobeen. Dhulka ay gacanta ku heyso, Al-Shabaab waxa ay ka dhaqan gelisaa mamnuucid ay ku soo rogtay shineemooyinka, miyuusigga, iyo daawashada ciyaaraha ka baxa telefishinada. Waxa kale oo ay mamnuucday ka ganacsiga Qaadka (maandooriye) ee magaalooyinka, cabitaanka sigaarka iyo dabeecad kasta oo loo arko in aanay sal ku laheyn "Islaamka" sida garka oo la xiiro, xirashada naas celiska iyo timaha si aan habooneyn loo jarto. Al-Shabaab waxa ay kale oo ay si adag u dhaqangelisay in dumarka xirtaan xijaabka.

Al-Shabaab waxa ay sii waday olole dacaayad ah oo kooxaha AMISOM ee ka soo jeeda Ugaandha, Burundi iyo Itoobiya iyo Kenya ee raacsan dawladda ku meel gaarka ah ay yihiin dad "Masiixiyiin ah" in ay dalka ku soo duuleen oo ay doonayaan in ay qabsadaan.

Al-Shabaab, waxa ay u geysatay wax kasta oo ciqaab ah dadka Soomaalida ah ee masiixiyiinta ah ee ku nool dhulka ay gacanta ku heyso. Sanadkan gudhiisa, Al-Shabaab waxa laysay dad lagu tuhmay in ay qaateen diinta masiixiyadda. Tusaaale ahaan, bishii Siteembar 2 deedii waxa ay shabaab qudha ka jartay qof masiixinimada qaatay duleedka magaalada Hudur, Bakool. 21kii Agoosto meydka qof qoorta laga gooyey oo masiixiyadda qaatay ayaa lagu soo tuuray wadada ka dib markii ay maleeshiyo raacsan Al-Shabaab ay afdubeen.

Al-Shabaab waxa ay si joogta ah mu'aamarad ugu sameeyaan ardayda dhigata dugsiyada quraanka. Waxa kale oo dugsiyada quraanka dhulka ay gacanta ku hayaan ku amreen in ay ardayda u dhigaan jihaadka kuna dhiiri geliyaan.

Sanadka oo dhan, Al-Shabaab waxa ay dhawr weerar ku qaadeen Muqdisho iyagoo la beegsaday waxa ay ugu yeereen "kuwa ridoobay" oo inta badan ay ula jeedaan dawladda ku meel gaarka ah iyo dadka taageersan. Weerarkii ugu darnaa waxa uu ahaa ka dib markii bishii Oktoobar 4teedii gaari lagu soo rakibay waxyaabaha qarxa uu ku qarxay meel xarun u aheyd dhawr wasaaradood oo ka tirsan dawladda ku meel gaarka ah. Qaraxyadaas waxaa ku dhintay in ka badan 100 qof, oo ay ka mid yihiin ardeyda jaamacadaha oo saf ugu jiray in loo sheego natiijada imtixaanka deeq waxbarasho ay dawladdu ugu deeqday.

Al-Shabaab waxa ay sii waday in ay ku eedeeyso hay'adaha samafalka, labadaba kuwa ku salaysan calmaaniyadda ama diintaba, in ujeedadoodu tahay in Soomaalida ka dhigaan masiixiyiin iyagoo handadaad u geysta naftooda iyo shaqadoodana khatar galiya.

Sanadkan, Al-Shabaab waxa ay burburisay qabriyada suufiyiinta, sheekhyada waaweyn, iyo kooxaha diimaha dhulka ay gacanta ku heyso. Tusaaale ahaan, bishii Nofeembar 6deedii magaalada Baardheer ee gobolka Gedo waxa ay Al-Shabaab ku burburiyeen in lagu qiyaasay 40 qabri. Kooxda ASWJ arrintaas waa ay mucaaradeen waxayna sheegeen in Al-Shabaab ay dooneyso in ay baabi'iso taariikhda muslimiinta dhexdhexaadka ah ee Soomaaliya. 20kii Abriil Al-Shabaab waxa ay burburisay afartan qabri oo ku yiil Mahadaay oo ka tirsan gobolka Shabeelada Dhexe. Al-Shabaab waxa ay qudha ka jartay dhawr qof oo raacsanaa ASWJ qeybo ka mid ah gobolka Galgaduud. Bishii Janaayo afhayeenka kooxda ASWJ ee gobolka Banaadir Maxamuud Axmed Shuuriye waxa uu Al-Shabaab ku eedeeyey in ay xiraan oo garaacaan sheekhyada raacsan ASWJ ee ku nool dhulka ay gacanta ku hayaan.

### **Qeybta III. Xaaladda Bulshada ee Ixtiraamka Xoriyadda Diimaha**

Waxaa jira warbixino sheegaya xadgudub bulshadu u geysatay ama heyb sooc ku dhisan diinta, ku dhaqanka iyo aaminsanaanta diinta. Waxaa jiray cadaadis fara badan oo dhinaca bulshada ka imanayey kaasoo ku cadaadinaya in la ixtiraamo habdhaqameedkii soo jirey ee islaamka Suufiyadda ku dhisan.

Dadka aan Muslimiinta aheyn ee ku dhaqma diintooda waxa ay la kulmaan qashqashaad fara badan. Bulshada ma ogola in dadku Islaamka ka baxaan oo diin kale qaataan. Kuwo lagu tuhmo in ay sidaas yeelaan waa la ciqaabaa ama waxaaba dila bulshada ay ku dhex nool yihiin.

### **Qeybta IV. Siyaasadda Dawladda Mareykanka.**

Dawladda Mareykanku safaarad kuma laha waddanka waana la adkeeyay safarka saraakiisha dawladda Mareykanka. Isaga oo kaashanaya siyaasadda kor kala socoshada ee waddanka, waxa ay dawladda Mareykanku si joogta ah u taageersan tahay Shirkii Nabadde ee Jabuuti iyo soo af jariidda mudada ku meel gaarka oo ku eg 20ka Agoosto 2012 sida uu dhigayo heshiiskii Kampala ee la saxiixay bishii Juun. Taageerada dawladda Mareykanka ee dhiirigelinta xoriyadda diinta ee Soomaaliya waxa ay ku kooban tahay taageerada dadaalka AMISOM iyo dawladda ku meel gaarka ah ee lagu xasilinayo Soomaaliya laguna soo celinayo kala dambeynta. Iyadoo ku dhaqmaysa siyaasadda kor kala socoshada ku dhisan, waxa kale oo dawladda Mareykanku xoojisay barnaamijyada gargaarka ee loo fidiyo Puntland iyo Somaliland iyo maamulada kale ee jira, sida Galmudug iyo dhulka gobolada dhexe ee laga xoreeyey Al-Shabaab. Wakiilka gaarka ah ee u xilsaaran arrimaha Soomaaliya oo fadhigiisu yahay Nairobi iyo shaqaalihiiisu waxa ay xooga si cad u saareen xoojinta xoriyadda xaga diimaha iyo xuquuqda aadamaha inay ka mid noqdaan dastuurka cusub.